Warbixin ku socota waalidka kuna saabsan Ururka Madax dhiigida ee caruurta

Ururka Madax dhiigida ee caruurta waxay qayb ka tahay Riksstroke, diiwaanka tayada ee qaranka oo fadhigeedu yahay maamulka gobolka ee Gobolka Västerbotten (VLL). Ujeedadu waa in kor loo qaado daryeelka madax dhiigida oo fiican looguna talogalay dadka oo dhan, iyadoo aan loo eegayn meesha la deganyahay, jinsiga iyo da'da. Tan iyo 1998 dhamaan isbitaalada Iswiidhan waxay macluumaad u soo gudbiyaan diiwaankan oo laga bilaabo 2016 waxaa ku jira xitaa caruurta. Diiwaankan waxaa maal-geliya Maamulka Arrimaha Bulshada iyo Degmooyinka iyo Gobolada Iswiidhan (SKL).

Madax dhiigid waa magaca guud ee xinjir dhiig ah oo adkaatay oo xididada dhiigga oodda ama dhiigida gudaha maskaxda. Madax dhiigidu waxay caadi ahaan ku badantahay dadka waaweyn iyo waayeelka marka loo eego caruurta, laakiin qiyaastii boqol caruur ah oo ah da'da 1 bil ilaa iyo 18 sanno ayay ku dhacdaa sannad walba gudaha Iswiidhan. Aqoonta ku saabsan madax dhiigida caruurta si joogto ah ayay u sii kordhaysaa och waxaa la cadeeyay in baaritaan iyo daweyn, xilliga deg-dega ah iyo inta lagu jiro la socodka labadaba ay micno u leedahay ilmaha caafimaadkiisa mustaqbalka iyo awoodaha neerfayaasha. Iyadoo loo marayo diiwaankan waxaanu doonaynaa inaanu hubino in caruurta uu ku dhacay madax dhiigid ay helaan baartiaan sax ah, daweyn iyo la socod iyadoo aan loo eegin meesha uu qofku ka deganyahay dalka ama ku xanuusaday. Hadafku waa in ilmo kastaa uu haysto awooda ugu fiican ee suurtagal ah dhinacyada kala duwan oo helo taageerada ilmahani u baahaynyahay.

Sidee ayaa diiwaan gelintani u dhacdaa?

Ilmaha dhakhtarkiisa ayaa diiwaan geliya macluumaadka ku saabsan baaritaanada la sameeyay, waxa lagu helay baaritaankan iyo daweynta ilaa iyo hal sanno ka dib marka xanuunkani yimi. Marka la marayo 3 iyo 12 bilood ka dib xanuusashada waxaa ilmaha waalidkiisa loo diraa warsashooyin.

Caruurtee ayaa lagu dari karaa?

Dhamaan caruurta ay ku dhacay madax dhiigid laga bilaabo da'da 1 bil ilaa iyo 18 sanno waxaa lagu soo dhawaynayaa inay ka qayb-qaataan diiwaanka madax dhiigida. Ka qayb qaadashadani maaha khasab. Qofku wuxuu xaq u leeyahay in xilligay noqotaba uu joojiyo ka qayb-qaadashadiisa iyadoo aan loo baahnayn in la sheego waxa arrintan sabab u ah. Caruurta ka qayb-qaadanaysa waxaa loo diiwaan geliyaa, waa haddii qofku aanu wax kale codsan, dhamaan macluumaadka ku saabsan ilmaha baaritaanadiisa, daweyntiisa iyo awoodaha wax-qabad oo la geliyo diiwaanka tayada ee qaranka.

Waa maxay sababtu?

Waxaanu aaminsanahay in ururinta dhamaan macluumaadka caruurta madax dhiigid ku dhacday ee Iswiidhan oo dhan si loo darso loona qiimeeyo ay kordhinayso fursadaha in la awoodo horumarinta iyo hubinta tayada daryeelka. Macluumaadkan la ururiyay waxay xitaa

kaalmo ka gaysanayaan aqoon cusub oo ku saabsan sida ugu fiican ee loo daryeeli karo dhibaatooyinka ku hareersan madax dhiigida caruurta iyo dhalinyarada.

Sidan ayaa loo maareeyaa macluumaadka
Macluumaadka ku saabsan ilmaha waxaa laga soo ururiyaa diiwaanka bukaanka iyo waalidka. Macluumaadka ilmaha ee ku jira diiwaanka tayada waxaa keliya ee loo isticmaali karaa in la horumariyo oo la hubiyo tayada daryeelka madax dhiigida, la soo bandhigo tirakoob isla markaana dhinaca cilmi-baarista dhanka daryeelka caafimaadka iyo bukaanka. Macluumaadkan waxaa xitaa ka dib baaritaanka waajibka xog qarinta shaqada loo gudbin karaa qofkii macluumaadkan u isticmaalaya mid ka mid ah saddexdan ujeedo. Haddii la oggolaado in la dhiibo macluumaad ku jira diiwaankan waxay tani u dhici kartaa qaab elaktarooni ah. Markaa macluumaadka ku jira diiwaankani ay wax la isticmaalo u noqdaan daraasadaha cilmi-baarisyada waxaa loo baahanyahay oggolaanshaha guddida eegida anshaxa (EPN).

Qarsoodi
Macluumaadka ilmaha waxaa ay hoos imanayaan qarsoodiga daryeelka caafimaadka iyo bukaanka ee dhinaca Sharciga guud ee xog qarinta. Tani micnaheedu waa in macluumaadkan laga dhiibi karo oo keliya diiwaankan haddii ay caddahay in ilmaha ama qof qaraabadiisa ah midnaba aanay dhib ama waxyeelo soo gaarayn haddii macluumaad laga bixiyo. Kaydka kombiyuutarka wuxuu xitaa hoos yimaadaa qawaaniinta Kormeerka Arrimaha ku kaydinta kombiyuutarada. Tani micnaheedu waa in ilma gaar ah aan lagu garan karin marka macluumaadkan lagu ururinayo warbixinaha guud. Qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu diido in macluumaadkiisa lagu diiwaan geliyo diiwaanka tayada ee qaranka iyadoo taasi aanay sinnaba raad ugu yeelanayn daryeelka ama xiriiryada lala leeyahay daryeelka bukaanka. Qofku waxaa kale oo uu xaq u leeyahay in macluumaadkiisa laga saaro diiwaankan (eeg xaashiyaha halkan ku lifaaqan). Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan diiwaanka madax dhiigida waxay ku jirtaa xaashiyaha halkan ku lifaaqan iyo bogga internet-ka www.barnriksstroke.se. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan diiwaanka tayada ee qaranka waxay ku jirtaa www.kvalitetsregister.se

Amaanka
Macluumaadka ilmaha ee ku jira diiwaankan waxaa laga ilaaliyay dadka aan xaqa u lahayn. Waxaa jira shuruudo gaar ah dhinaca talaabooyinka amaanka kuwaas oo micnaheedu tahay in qofka u baahan macluumaadka ilmaha oo keliya uu heli karo kuwan, in la hubiyo in qof aan xaq u lahayn helo macluumaadkan, in macluumaadka ilmaha la ilaaliyay iyadoo loo maray qoraalo qarsoodi ah iyo in gelitaanka kombiyuutarka si loo helo macluumaadkan ay u dhici karto qaab amaan ah oo keliya.

Helitaanka
Daryeel bixiyaha caafimaadka ee warbixin u soo dira diiwaankan waxa keliya ee ay si toos ah u heli karaan macluumaadka ay iyagu soo gudbiyeen. Ma jiro daryeel bixiye caafimaad oo kale oo si toos ah u heli kara macluumaadkan. Dadka xarunta ka maareynaya diiwaanka waxay awoodu haystaan oo heli karaan macluumaadka ilmaha.

Tuurida wixi aan loo baahnayn
Macluumaadka ilmaha waa la tuuraa marka aanay sii jirin baahi in la horumariyo oo la hubiyo tayada daryeelka madax dhiigida.

Ilmaha iyo waalidka xuquuqdooda

- Ka qayb-qaadashada diiwaankan maaha khasab oo raad ma ku yeelato daryeelka ilmaha. Haddii aanad doonayn in macluumaadka ilmaha la geliyo diiwaankan, la xiriir qofka lala xiriirayo ee hoos ku qoran.

- In wakhti kasta oo la doonayo xaq loo helo in macluumaadka ku saabsan ilmaha laga masaxo diiwaankan.

- In la helo daabacaada qoraalka ee dadki macluumaadkan galay xarunta caafimaad ee ay yihiin iyo wakhtiyada uu qof helay macluumaadka ilmaha.

- Dhinaca magdhowga hadii macluumaadka shakhsiga ah loo maareeyo si ka hor imanaysa sharciga macluumaadka shakhsiga ah ama sharciga kaydinta macluumaadka bukaanka.

- In la codsado saxitaanka macluumaadka.

- Adigu waxaad haysataa hal mar sannadkiiba, bilaash ah, xaq u leedahay inaad ogaato nooca macluumaadka shakhsiga ee la diiwaan geliyay kuna saabsan ilmaha (daabacaada diiwaanka). Codsiga noocan ahi waa inuu ahaadaa qoraal, saxeexan oo loo diraa qofka lala xiriirayo ee hoos ku qoran.

Macluumaadka xiriirka

Adigu xiriir waad soo samayn kartaa haddii aad doonaysid

- Hel warbixinta ku saabsan xarunta caafimaad iyo wakhtiyada uu qof helay macluumaadka ilmaha.
- Hel warbixin dheeraad ah oo ku saabsan diiwaanka.
- In anagu aananu gudbin macluumaadka ilmaha ee ku jira diiwaanka.
- In macluumaadka ilmaha laga masaxo diiwaanka.

Rut Inger Enryd, Barn- och UngdomsCentrum, Norrlands Universitetssjukhus, 901 85 Umeå.
Moobil: 072-249 2420. e-post: rutinger.enryd@vll.se

(Qofka lala xiriirayo dhanka Ururka madax dhiigida caruurta; magac, telafoon, e-post, cinwaan. Eeg xitaa bogga internet-ka www.barnriksstroke.se)

Miyaad doonaysaa inaad hesho daabacaada diiwaanka, codsigaaga oo qoraal ah u dir:

Josefine Leijon, landstingsjurist, Ledningsstaben Västerbottens Läns Landsting, 901 89 Umeå.
Tel: 090-785 7315. e-post: josefin.leijon@vll.se

(Wakiilka macluumaadka shakhsiga/mas'uulka maxaliga ah; agac, telafoon, e-post, cinwaan)

_____

Mas'uulka macluumaadka shakhsiga

Mas'uulka maxaliga ah ee macluumaadka shakhsiga (guddida siyaasada ama hogaanka) dhinaca macluumaadka la uruuriyo iyo kuwa loo gudbiyo diiwaanka waa:

Mas'uulka muhiimka ee macluumaadka shakhsiga waa Hogaanka maamulka gobolka ee gobolka Västerbotten, isbitaal jamicadeedka Norrlands, 901 85 Umeå.

BARNRIKSSTROKE
The Swedish Pediatric Stroke Register

Information till ungdomar om BarnRiksstroke.

Macluumaadka ku socda dhalinyarada ee ku saabsan Ururka caruurta ee madax dhiigida

Madax dhiigid micnaheedu waa in qofka ay ku dhacday xinjir dhiig ah oo adkaatay oo xididada dhiigga oodday ama dhiigida gudaha maskaxda. Madax dhiigidu waxay caadi ahaan ku badantahay dadka waaweyn iyo waayeelka marka loo eego caruurta, laakiin qiyaastii boqol caruur ah ayay ku dhacdaa sannad walba gudaha Iswiidhan. Laga soo bilaabo 2016 waxay isbitaalada Iswiidhan wada-shaqayn ka sameeyaa dhinaca diiwaan kombiyuutar looguna talogalay caruurta iyo dhalinyarada u xanuusatay madax dhiigida. Adeegsiga caawimaada diiwaankan waxaanu doonaynaa inaanu hubsano in ilmo ama dhalinyar kasta oo ay ku dhacday madax dhiigid helo daaweyn sax ah iyo caawimaad.

Sidee ayaa diiwaan gelintani u dhacdaa?
Dhakhtarkaaga ayaa diiwaan geliya macluumaadka ku saabsan baaritaanada aad samaysay inti lagu jiray sannadki ugu horeeyay ee ka dambeeyay markii xanuunkani kugu dhacay. Ka dib 3 iyo 12 bilood waxaaa waalidkaaga loo soo dirayaa warsasho wadata su'aalo ku saabsan sida caafimaadkaagu yahay iyo nooca daweynta ama tababarka ah ee aad heshay

Yaa ka mid ahaan kara?
Dhamaan caruurta iyo dhalinyarada u dhaxaysa 1 bil ilaa iyo 18 sanno ee u xanuusatay madax dhiigid waa lagu soo dhawaynayaa inay ka mid ahaadaan diiwaankan. Ka qayb qaadashadani maaha khasab. Qofku wuxuu xaq u leeyahay in xilligay noqotaba uu joojiyo ka mid ahaanshahan iyadoo aan loo baahnayn in la sheego waxa arrintan sabab u ah.

Waa maxay sababtu?
Maadaama madax dhiigida caruurta iyo dhalinyaradu aanay aad u badnayn waxaanu aaminsanahay in diiwaankan macluumaadku uu naga caawin karo inaanu sii fiicnaysiino daryelka loogu talogalay dadka uu ku dhacay. Waxaa kale oo aanu aaminsanahay in aanu si fudud u hubsan karno in bukaan kastaa helo daryeelka iyo caawimaada qofku u baahanyahay si la isugu dabari karo sida ugu fiican ee suurtagal ah.

Qarsoodi
Kaydka kombiyuutarka wuxuu hoos yimaadaa go'aamada qarinta sirta ee daryeelka caafimaadka iyo qawaaniinta Kormeerka Arrimaha ku kaydinta kombiyuutarada. Tani micnaheedu waa in Adiga macluumaadkaaga aan lagugu garan karin marka macluumaadkan la galinayo warbixinaha guud. Adigu waxaad xaq u leedahay inaad diido in macluumaadkaaga lagu diiwaan geliyo diiwaanka tayada ee qaranka iyadoo taasi aanay sinnaba raad ugu yeelanayn daryeelka ama xiriiryada aad la leedahay daryeelka bukaanka. Haddii aad doonaysid inaad ogaato nooca macluumaadka ee kugu saabsan ee ku kaydsan diiwaankan, haddii aad doonaysid in macluumaadkan laga saaro ama aad doonaysid inaad ogaato sida macluumaadkaaga loo isticmaalay markaasi xaq ayaad tan u leedahay. Waalidkaaga ama dhakhtarkaaga ayaa haya macluumaadka sida saxda ah ee ay tani u dhacdo.

Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan diiwaankan waxay ku jirtaa xaashiyaha macluumaadka ee waalidka iyo bogga internet-ka www.barnriksstroke.se.

Macluumaadka xiriirka

Adigu haddii aad doonaysid inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan diiwaankan waxaad la xiriiri kartaa:

Rut Inger Enryd, Xarunta Caruurta iyo Dhalinyarada, isbitaal jamicadeedka Norrlands, 901 85 Umeå.
Moobil: 072-249 2420. e-post: rutinger.enryd@vll.se

(Qofka lala xiriirayo dhanka Ururka madax dhiigida caruurta; magac, telafoon, e-post, cinwaan.